

Waxa laga ogaado wax ku saabsan bararka fadhiga wadnaha, bararka dhinacyada fadhiga iyo tallaalada COVID mRNA

Bararka fadhiga wadnaha waa bararka muruqa wadnaha. Bararka dhinacyada fadhiga waa bararka leenka ku wareegsan wadnaha. Labada xaaladoodba ayaa lagu soo wargeliyay tiro yar oo dacwadaha kadib qaadashada tallaalka mRNA COVID-19 iyo inta badan waxay ku dhacaan ragga da'dooda ah 12-39 badelkii dumarka ama kooxyada da'da weyn. Tallaalada Moderna iyo Pfizer ayaa ah mRNA. Cilmi baarayaasha caafimaadka ee Xarumaha Xakameynta iyo Ka hortaga Cudurka (CDC) ayaa daraasadeeyay dacwadahaan oo go'aansaday in halista jirada daran ee ka imaaneyso COVID-19 ay aad uga weyntahay oo aad uga darantahay halista ah inay ku dhacaan mid ka mid ah xaaladahaan wadnaha tallaalka kadib.

Taqasusyada caafimaadka ayaa sii wado inay kula taliyaan tallaalka da'da qof walba oo da'da 12 iyo ka weyn sababtoo ah:

- COVID-19 ayaa ku sababi karo jirooyin daran iyo dhimasho dadka oo da' walba ah.
- COVID-19 ayaa sababi karo arimaha caafimaadka muddada dheer, oo ay ku jiraan dhibaatooyinka neerfayaasha ama shaqada sambabka oo yaraata ee dadka da' walba.
- Bararka fadhiga wadnaha, bararka dhinacyada fadhiga ayay aad ugu dhowdahay inuu sababo caabuqa COVID-19 badelkii sababo tallaalka ah.
- Halista waxyeelada wadnaha ee ka imaaneyso COVID-19 ayaa aad uga darnaan karto inuu ku dhaco bararka fadhiga wadnaha, bararka dhinacyada fadhiga tallaalka kadib.
- Xittaa haddii qof uu ku dhaco mid ka mid ah xaaladahaan tallaalka kadib, inta badan dadka ayaa uga soo kabsado iqtiyaarkooda ama daaweynta ugu yar.
- Faysaska ka duwan ee Delta oo hadeer ku faafayo ayaa loo maleeyaa inuu si aad ah ugu faafi karo badelkii noocyada horaan u faafayay.
- Tallaalada ayaa ah badqab iyo waxtar oo ka hortagaa jirooyinka daran ee COVID-19.
- Tallaal qaadashada ayaa illaaliso adiga, kuwa kaa ag dhow, oo ku caawisaa joojinta ku faafinta COVID-19 bulshadaada.

Haddii aad qabtid su'aalo ama walaacyo ku saabsan tallaalada COVID-19, waxaan ku talineynaa inaad la hadashid dhaqtarkaaga ama bixiyaha daryeelka caafimaad.

Wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan bararka fadhiga wadnaha, bararka dhinacyada fadhiga, booqo:

- Xaqiiqaha bararka fadhiga wadnaha, Bararka dhinacyada fadhiga: <https://www.cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/vaccines/safety/myocarditis.html>
- Dib u eegida ACIP ee Dacwada: <https://www.cdc.gov/vaccines/acip/work-groups-vast/report-2021-05-24.html>

Helitaanka dukumiintiga: Shaqsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriiska, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale oo dadban sida fasiraadaha, daabicida farta waaweyn, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir Xarunta Macluumaadka Caafimaadka 1-971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us